Asylum Advice

Go’aanka kadib - Ogolaansho

Section 4A:
Go'aanka kadib - Ogolaansho

Qaybtaan wuxuu macnaynayaa wixii dhici doono haddii lagu siiyo sharciga 'Leave to Remain'(Fasaxa Joogitaanka) dalka Ingiriiska (UK) kadib markii la tixgeliyo codsigaaga magangalyo. Macluumaadka hoose wuxuu kuu macnaynayaa wixii dhici doono.

4A.1 Waa maxay macanaha nooca sharcigayga?

Home Office wuxuu ku siin karaa seddax nooc oo sharci ah:

1. Refugee Status (Aqoonsi Qaxooti)
Haddii lagugu aqoonsadey qaxooti waxaa loola jeedaa in Home Office u go'aamiyey inaad tahay qaxooti sida uu qabo Refugee Convention (Heshiiska Qaxootiga) iyo inaad qabtid cabsi dhab ah in lagu caddibo sababtoo ah hal ama ka badan shuruudahaan: jinsigaaga, diintaada, dhalashadaada asalnimo, xubinnimadaada koox bulshadeed gaar ah ama ra'yigaaga siyasadeed.

Home Office wuxuu marka horey ku siin doonaa sharciga 'leave to remain' (kani waa xaqa aad ku joogto dalka UK) muddo shan sanno ah. Warqadahaada biometrikada iyo kuwa Home Office waxay xaqiijin doonaan in lagugu aqoonsadey qaxootinimo.

Siyaasadda laanta socdaalka wuxuu qexaayaa in muddo 5 sanno kadib ee aqoonsi qaxootinimo iyo badbaadin bini'aadanimo aad codsan kartid sharciga 'Indefinite Leave to Remain' (Fasax joogitaan aan leheen shuruudo waqti ah, kani badanaa waxaa lagu yaqaana sharciga 'settlement (deganaanshada)'.)

Hase-yeeshe, haddii adiga ama xubin ka mid ah tiirsanayaashaada lagu xukumo dembi kani waa laguu diidi karaa.

2. Humanitarian protection (Badbaadin Bini'aadan)
Kani waxaa loola jeedaa in Home Office u go'aamiyey inaadan u qalmin aqoonsiga qaxootinimo, laakiin wuxuu ogol yahay inay jiraan waxyaabo muujinaayo in haddii laguu celiyo waddankaaga asalka, aad la kulmi doontid halis dhab ah in wax-yeello xun ku gaaro. Kani sababtiisa wuxuu ahaan karaa

- ciqaab dil/ dil,
- dil sharci darro.
- jirdil.

- macaamilid xaasidnimo iyo sharaf ridid leh.
- ciqaabid ama handadaad xun iyo shakhsiyaadeed ee noolosha sababtoo ah rabshad kala sooc lahayn ee xaalado dagaal sokeeya ama caalami ah.

Haddii lagu siiyo Humanitarian Protection (Badbaadin Bini'aadan) waxaa lagu siin doonaa sharciga 'leave to remain' (xaqa aad ku joogto) dalka UK muddo shan sanno. Dokumentiyadaada waxay xaqiijin doonaan in fasaxa ogolaanshada laguu siiyey sababo bini'aadanimo.

Siyaasadda laanta socdaalka wuxuu qexaayaa in muddo 5 sanno kadib ee badbaadin bini'aadanimo aad codsan kartid sharciga 'Indefinite Leave to Remain'(Fasaxa Joogitaanka Aan Xad leheen)

3. Discretionary leave to remain (Fasaxa Joogitaanka Ikhtiyaariga ah)
Haddii Home Office uusan ogolaan inaad u qalanto badbaadin bini'aadan ama aqoonsi qaxootinimo, laakiin ogol yahay inay jiraan sababo macquul ah ee laguu ogolaado inaad si ku meel gaar ah ku joogto dalka, waxaa lagu siin doonaa sharciga 'discretionary leave to remain' (xaqa joogitaanka).

Discretionary Leave waxaa badanaa la baxshaa muddo aan ka badnayn labo sanno iyo bar (30 bilood) goortiiba. Waxaad awoodi doontaa inaad codsato in la fidiyo fasaxaada joogitaanka, iyo shan sanno kadib waxaad codsan kartaa 'Indefinite Leave to Remain'.

4A.2 Miyaan rafcaan codsan karaa haddii lay diido aqoonsi qaxootinimo?

Haddii lagu siiyey badbaadin bini'aadan ama fasaxa joogitaanka ikhtiyaariga ah, oo ah in ka badan 12 bilood, laakiin aaminsan tahay inaad qabtid sababo xoog ah in lagu siiyo aqoonsi qaxootinimo markaa waxaad rafcaan ka dalban kartaa go'aanka Home Office. Kani waxaa lagu magacaaba rafcaan dallacsan; waxaad u baahan tahay inaad kani kala hadasho looyarkaaga. Haddii aad ku guuleysato waxaa lagu siin doonaa aqoonsi qaxootinimo.

4A.3 Maxaa dhici doono markii sharcigayga iga dhici rabo?

Markii la gaaro dhammaadka fasaxaada joogitaanka, waxaad u baahan tahay inaad Home Office u dirto codsi kale. Waxaad codsigaaga diri kartaa oo kaliya 28 maalmood kahor taariikhda u dhacaayo fasaxaada joogitaanka.

Waa muhiim in codsigaaga la helo kahor intuusan fasaxaada joogitaanka dhicin. Haddii Home Office go'aan ka gaarin codsigaaga kahor intuu dhicin fasaxa joogitaanka aad iminka qabtid, markaa waxaad sii lahaan doontaa isla xuquuqyada aad leheed. Haddii

Home Office codsigaaga helo kadib markuu fasaxaada joogitaanka dhaco markaa waxaa suurtogal ah inaad si sharci darro ah ku joogi doontid dalka UK. Kani waxaa loola jeeda inaad lumin doontid xaqa aad ku shaqeyso, ceyr qaadato iyo xuquuqyada oo dhan ee xiriir la leh fasaxa joogitaanka. Haddii uu kani dhaco waxaad u baahan doontaa inaad si deg-deg ah u hesho talo sharciyeed. Macluumaad kani ku saabsan waxaa laga heli karaa bogga internetka ee laanta socdaalka Home Office.

Haddii lagu siiyey 'Discretionary Leave to Remain' waxaad u baahan doontaa inaad codsato waqtiyo dheeraad ah ee fasaxa joogitaanka. Waxaa lagu siin doonaa fasax joogitaan dheeraad ah haddii aad u sii qalanto sida uu qabo siyaasadda. Waa inaad kani samayso ilaa aad fasaxa joogitaanka ka heshey wadar ahaan toban sanno. Maclumaadka ku saabsan codsiga fasax joogitaan oo dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka Home Office ee https://www.gov.uk/browse/visas-immigration

Waqtigaan kadib waxaad codsan kartaa 'indefinite leave to remain'(Fasaxa Joogitaanka Aan Xad leheen)'. Haddii aad ku guuleysato codsigaaga, dib uma lahaan doontid waqti xad ah oo aad ku joogto dalka UK.

Macluumaad muhiim ah: Waa muhiim in lala wocdo is-beddelada siyaasadaha ee laanta socdaalka ee muddo kadib is-beddeli karo. Waxaad kani samayn kartaa markaad dib u eegto bogga internetka Home Office ee
https://www.gov.uk/browse/visas-immigration

4A.4 Waa maxay nooca dokumentiyada la i siin doono?

Biometric Card (Kaadhka Biometrik)
Fasaxaada deganaanshada waxaa lagugu siin doonaa kaadh biometrik ah. Dokumentigaan wuxuu la mid yahay kaadhkaaga ARC. Kaadhkaaga biometrik wuxuu caddayn doonaa inaad dalka UK degnaan kartid, waxa ka baran kartid iyo ka shaqayn kartid. Waa inaad kaadhkaaga biometrik u isticmaasho sida nooc aqoonsi. Waa inaad muujisaa markii aad akownti banki ka furanayso dalka UK.
Lagaama rabo inaad mar walba sidato, laakiin waa inaad isticmaasho markii aad dalka UK ka xaqiijinayso xuquuqyadaada iyo waxyaabaha aad xaq u leedahay.

Kaadhkaaga biometrikada, boostada ayaa si ammaan ah loogu soo diri doonaa adiga ama looyarkaaga. Xubin walba ee qoyskaaga waxay heli doonaan kaadh gaar u ah. Kaadhkaaga biometrik waxuu muujinaayaa magacaada, jinsigaaga, taariikhda iyo goobta aad ku dhalatey, sawirkaaga, xaaladdaada haajireed, goorta uu fasaxa joogitaanka dhici doono, faah-faahinta waxyaabaha aad xaq u leedahay iyo saxiixaaga. Qaybta la geliyo macluumaadka elektronikada (chip) ee kaadhkaaga biometrik waxaa ku jiro farahaaga iyo sawirka wajigaaga.

Macluumaad muhiim ah: waa inaad eegtaa in dhammaan faahfaahinta kaadhkaagu

sax yahay. Waa inaad si deg-deg ah Home Office u sheegtid khalad walba.

Waa in aad khalad kasta gaarsiisid 10 maalmood ee maalmaha shaqada gudohood marka laga bilaabo wakhtigii aad heshay kaarka. Haddii aadan sidaa yeelin waxaa laga yaabaa in aad mar kale dalbatid isla markaana aad bixisid kharajka laguugu baddalayo kaarka. Email ayaad u soo diri kartaa: BRPError@homeoffice.gsi.gov.uk adiga oo emailkaga ku soo qoraya:

- lambarka Baasaboorkaaga
- lambarka warqaddaada degganaanshaha (biometric residence permit number)
- tixraaca lambarka kiiskaaga (your case reference number)
- lambar telefoon oo lagaala soo xiriiri karo
- faah-faahin sax ah ee macluumaadka khaldan

Ka warran haddii aan lumiyo Kaadhkayga Biometrikada (Biometric Card)?
Haddii kaadhkaaga biometrik la xado ama kaa lumo, waa inaad sida ugu dhaqso badan u sheegtaa Home Office.Home Office wuxuu u baahan doonaa inuu joojiyo kaadhkaaga biometrikada. Waa waajibaadkaaga sharciyeed inaad joojiso kaadhka oo aad Home Office ku ogeysiiso emailan: BRPLost@homeoffice.gsi.gov.uk.

Emailkaaga waa inaad ku soo qorto:

- magacaaga buuxa;
- taariikhda dhalashadaada;
- dhalashadaada;
- lambarka baasaboorkaaga;
- lambarka tixraaca kaadhkaaga biometrikada;
- lambarka tixraaca kiiskaaga;
- faahfaahintaada xiriirka; iyo
- goorta, goobta iyo sida uu kaadhka u lumey ama loo xadey.

Sida ugu dhaqso badan waa inaad xittaa luminta ama xatooyada u sheegto booliska, oo ka hesho warbixinta booliska iyo lambarka tixraaca dembiga. Haddii kaarkaag la xaday waa in aad tagtid saldhigga booliska una sheegtid dembiga fal dambiyeedka. Haddiise uu kaarku kaa lumay waa in aad warbixin ku qortid https://www.reportmyloss.com - Tan qiimaheedu waxa uu kuugu kacayaa £3.95 meelaha inta badan si aad u sheegtid lumitaanka. Waxa aad u baahan tahay kaarka bangiga ee (debit/credit card) si aad tan u samaysid.

“Waxaad u baahan doontaa inaad codsato kaadh biometrik cusub. Macluumaad ku saabsan kani waxaa laga heli karaa bogga internetka Home Office. https://www.gov.uk/biometric-residence-permits

National Insurance Number (NINO) (Lambarka Caymiska Qaranka)
Markaad samayso waraysigaaga wayn ayaa xittaa la sameyn doonaa waraysiga lagu helo National Insurance Number. National Insurance Number waa lambar tixraac oo adiga gaar ku ah. Kani waxaa dalka UK looga isticmaalaa in lagu maamulo caymiska qaranka iyo habka gargaarka bulshada. Noloshaada oo dhan ayaad lambarkaas isticmaali doontaa. Waxaa lagu hubiyaa in tabaruuca qaranka iyo canshuurta aad bixiso si habboon lagu diiwaangeliyo magacaaga. Wuxuu xittaa yahay lambar tixraac markii lala xiriiraayo Department for Work and Pensions (DWP) (Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka) iyo HM Revenue & Customs (HMRC) (Canshuurta & Kastamka Boqortooyada).

National Insurance Numbers waxa caadi ahaan la siiyaa dadka ka wayn 16 jir.

Tiirsanayaasha wayn ma maraan waraysiga NINO markii la sameynaayo Waraysiga Magangalyada.Sidaas awgeed si otomatik ah uma heli doonaan NINO. Waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto Department of Work and Pensions oo ayaga ayaa tiirsanayaashaada u qabanqaabin doono NINO.

Haddii aad u baahan tahay inaad codsato NINO sababtoo ah waxaad rabtaa inaad shaqo bilowdo ama noqoto qof iskiisa u shaqeysto, markaa xafiiska:

Job Centre Plus kala xiriir
0845 600 0643

Haddi aad codsaneysid ceyr, Department for Work and Pensions (DWP Job centre) ayaa kuu buuxin doono foomka ceymiska qaranka markii aad Job Centre (Xarunta shaqada) lagugu waraysanaayo. Foomkaan waxaa lagu magacaaba ‘DCI 1B form’. Kani wuxuu kuu codsan doonaa in lagu siiyo NINO.

Haddii laguu waco waraysiga National Insurance Number, waxaad u baahan doontaa inaad caddayso aqoonsigaaga iyo xaqa aad u leedahay inaad ka shaqeyso dalka UK. Kaadhkaaga biometrikada ayaad kani ku caddayn kartaa. Waxaa xittaa lagaa codsan karaa inaad dokumentiyo kale horey u qaadato. Warqad kuu xaqiijinaayo macluumaadka lagaa rabo inaad geyso ayaa laguu siin doonaa.

4A.5 Faahfaahinta khuseeya Integration Loan

Haddii lagu siiyey badbaadin bini’aadan ama aqoonsi qaxootinimo waxaad codsan kartaa ‘Integration Loan (Amaahda La Qabsashada Waddanka)’. Amaahda la

qabsashada waddanka waa nidaam amaah uu soo saarey Home Office si uu kugu garabsiiyo marxaladaha ugu horeeya ee la qabsashada waddanka. Amaahda waxaa loo isticmaali karaa wax-qabadayada iyo waxyaabaha fududeeyo la qabsashada waddanka sida:

- Tababar xirfadeed oo aan laga heli karin Job Centre Plus. Kani waa inaad kala hadashaa talo-bixiyahaaga Job Centre.
- Debaajiga degaan;
- Iibsashada waxyaabaha lagama marmaanka ah ee guriga; ama
- Iibsashada qalabyada ganacsi lagu qabto.

Haddii aadan qabin akownti banki waxaad codsan kartaa oo kaliya ilaa £450.00. Sidaa awgeeda, waa muhiim inaad furato akownti banki haddii aad rabtid in lacag ka badan codsato. Department for Work and Pensions (DWP) ayaa si joogto qayb-qayb u aruurin doono amaahda aad dib u bixiso. Kani waxaad ku samayn kartaa habka bixinta tooska ah ee akowntigaaga bankiga ama waxaa laga goosan karaa ceyrtaada. 28 Xaaladaha badankood lacag-bixinta amaahda waxuu bilaaban doonaa lix usbuuc kadib markii lacagta la siiyo shakhsiyaadka. Waxaad u baahan doontaa inaad saxiixdo foomka heshiiska amaahda kahor intii lagu siinin amaahda. Ma awoodi doontid inaad codsato amaahda la qabsashada waddanka haddii aadan qabin National Insurance Number.

Haddii aad codsiga samayso adigoo lambar caymis qabin codsigaaga waxaa loola dhaqmi doonaa sida mid aan dhammaystirneen iyo waa la diidi doonaa iyo waa laguu soo celin doonaa:

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa
https://www.gov.uk/refugee-integration-loan/overview

4A.6 NASS 35

Haddii aad Home Office ka heli jirtey taageerid waxaad xittaa heli doontaa NASS 35. Kani waa dokumenti A4 oo bac ku dahaaran, oo leh sawirkaaga iyo faah-faahinta taageeradaada. Kani waxaa kuu soo diri doono Home Office Support Team (Kooxda Taageerida Home Office). Wuxuu xaqiijin doonaa taageerida aad heshey iyo wuxuu xaqiijin doonaa goorta uu taageeradaada joogsan doono. Dhammaan taageerada Home Office wuxuu dhamaan doonaa 28 maalmood laga bilaabo taariikhda aad adiga ama looyarkaaga hesheen ogeysiiska go'aankaaga. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo codsiga NASS 35 fadlan la xiriir Asylum Help on 0808 8000 640.

4A.7 Sidee uu taageeraa nafteyda iyo midda qoyskeyga?

Home Office dib uma lahan mas'uuliyad inuu ku taageero 28 maalmood kadib markii lagu siiyo ogeysiiska xaaladdaada (sharcigaaga). Waxaad warqad ka heli doontaa Home Office iyo bixiyaha degaankaaga (haddii uu Home Office ku taageero), halkaasoo lagugu xaqiijinaayo taariikhda la joojin doono taageeradaada iyo taariikhda lagaa rabo inaad ka baxdo degaankaaga. Waa inaad degaankaaga ka baxdo iyo ka qaado dhammaan hantidaada taariikhdaas ka hor.

4A.8 Degaan: England iyo Wales

Baahida mudnaanshada degaanka (guriyeyn deg-deg/ku meel gaar ah)
Haddii aad guri-laawe tahay waxaad kawnsalka iyo waaxyada guriyeynta xaafaddaada ka codsan kartaa inay ku caawiyaan. Kawnsalka aad ku nooleed ayaa sharci ahaan laga rabaa inuu ku siiyo talo iyo gargaar. Ayadoo ku xiran xaaladdaada shakhsiyadeed, waa inay kuu helaan degaan/hoy.

Haddii aad u malayso inaad leedahay baahi mudnaansho (kani waxaa sabab u noqon karo; carruurta qoyskaaga, qof qabo xannuun aad u xun – maskax ama jir ah, ku jirtid halis xad-gudub/rabshada guriga), markaa waa in xafiiska guriyeynta ku helo degaan. Waxaad u baahan doontaa inaad samayso codsi guri'laawanimo.Kawnsalka deegaanka ayaa kani qiimayn doono si ay u eegaan haddii ay mas'uul ka yihiin inay ku siiyaan degaan. Waxay qiimayn doonaan haddii aad tahay guri'laawe, ku jirtid baahi mudnaansho, si ula kac guri'laawe u noqotey iyo/ama xaafadda la leedahay xiriir.

Haddii kawnsalka kuu qiimeeyo sida qof leh 'priority need (baahi mudnaansho)' markaa waxay ku siin doonaan guriyeyn deg-deg ama ku meel-gaar ah. Degaanka deg-degga wuxuu badanaa noqon doonaa hotel yar ee nooca sariir & quraac (B&B) ama degaan nooca hostel. Sharciga wuxuu sheegayaa in kawnsalka uusan in ka badan 6 usbuuc ku hayn karin hotelada nooca sariir iyo quraac haweenada uurka leh iyo qoysaska. Waa inaad talo ka raadsataa.

Shelter- waxay ku siin karaan talo madaxbannaan ee khuseeya dhammaan xuquuqyada guriyeynta iyo waxa lala xiriiri karaa: 0800 800 4444

Waxaad xittaa awoodi kartaa inaad xaafaddaada ka hesho xarun talo-siin guriyeyn oo madaxbannan ah.

Haddii kawnsalka ogolaado inaad tahay guri'laawe iyo aqbalo inay mas'uul ka yihiin inay guri kuu heelaan. Waxay ku siin karaan:

1) Council Housing (Guri Kawnsal).
2) Housing association Housing (Guri Ururka Guriyeynta).

3) Guri kiro caynsan ee waqti dheer ah.

Kawnsalka wuxuu ku siin karaa mid walba ka mid ah noocyada degaan ee kor ku qoran. Markii ay ku siiyaan guri habboon waajibaadkooda wuu dhammaan doonaa.

Haddii aad u malayso in guriga lagu siiyey uusan kuu habboonayn waxaa muhiim ah inaad raadsato talo madaxbannaan ah ka hor intii aadan diidin guriga lagu siiyey. Haddii aad diido guriga lagu siiyey iyo loo arko inuu ku habboon yahay baahidaada, markaa kawnsalka wuxuu xaq u leeyahay inuu joojiyo waajibaadka saaran. Waxay joojin karaan guriyeyn deg-deg walba sababtoo ah waxaa laguu arki doonaa inaad 'making yourself intentionally homeless (si ula kac ah guri' laawe iska dhigtey'.

Shelter wuxuu ku siin karaa talo madaxbannaan ah ee khuseya dhammaan xuquuqyada guriyeynta iyo waxaa lagala xiriiri karaa: 0800 800 4444

Xaafaddaada waxaad xittaa ka heli kartaa xaruun talo-siin guriyeyn madaxbannaan ah.

Private Accommodation (Guri khaas loo leeyahay)
Haddii la arko inaadan qabin baahi mudnaansho, markaa waa inaad raadsato guri kiro.

Waxaad codsan kartaa rafcaan haddii aad u malayso in kiiskaaga uu leeyahay mudnaansho iyo kawnsalka ku ogolaanin. Xaaladahaan markii ay jiraan waa inaad raadsato talo sharciyeed madaxbannaan ah.

Haddii aad rabtid inaad guri kireysato milkiilayaasha badankooda waxay rabaan dabaaji iyo hal bil buuxa oo kiro ah. Ha'yad guriyeyn deegaan ayaa awoodi doono inay kuu xaqiijiyaan haddii kani caawinaad ama taageero ka heli kartid xaafaddaada. Tusaale ahaan waxaa xaafadda ka jiri karo nidaam damaanad ama dabaaji. Waxaad xittaa codsan kartaa in amaahda la qabsashada waddanka uu kani kugu taageero.

Street Homeless (Guri'laawe Waddo Seexdo)
Haddii aad tahay guri laawe dariiqa seexda waxaa jira hay'ado deggan xaafaddada kuwaasoo laga yaabo in ay ku caawiyaan. Golaha degaankaaga (your local council) ayaa kaa caawin kara in aad heshid magacyada iyo cinwaannada hay'adaha degaanka iyo/ama goobaha la gabbaadsado habeenkii (shelters) oo iyagna laga yaabo in ay ku caawin karaan. Goobahaani waxay noqon karaan ammaan in la seexdo oo laga helo kiish wayn la dhex galo laguna seexo (sleeping bag) iyo raashin kulul.

Waxaad xittaa la xiriiri kartaa SHELTER; waxay ku siin karaan talo madaxbannaan ah khuseeya dhammaan xuquuqyada guriyeynta iyo waxaa lala xiriiri karaa 0800 800 4444

Waxaad awoodi doontaa inaad hesho:
Day Services (Adeegyada Maalinta) - waxay kugu caawin karaan cuntada, dharka iyo qubayska. Waxay ku siin karaan talo madaxbannaan ah.

Emergency Hostels and Night Shelters (Hostelada deg-degga ah iyo Guryaha Lagu Badbaado Habeenka) - waxaad dhowr habeen ka heli kartaa hoy haddii aad waddada jiifto.

Waxaad xittaa **STREETLINK** kala xiriiri kartaa 0300 500 0914 waxaa suurtogal ah inay ku siin karaan talo.

4A.9 Degaan: Skotland

Haddii aadan qabin meel aad joogto waxaad caawinaad ka codsan kartaa Waaxda Guriyeynta ee Kawnsalka Xaafaddaada. Kawnsalka meesha aad ku nooshay sharci ahaan waxay mas'uul ka yihiin inay ku siiyaan talo iyo gargaar. Haddii aad samayso codsi guri'laawonimo waxaa lagu siin doonaa taageerid deg-deg ah intii waaxda guriyeynta ka qiimeynaayo u qalmiddaada. Haddii kawnsalka uusan aaga ku leheen degaan firaaqo ah, waxay degaan kaa siin doonaan meel ka baxsan aagga.

Haddii ay go'aamiyaan inay mas'uul ka yihiin inay ku taageeraan, markaa waxay ku siin doonaan degaan joogto ah.Waxaad joogi kartaa degaankaaga ku meel gaarka ah ilaa lagu siiyo degaan joogto ah.

Haddii aysan mas'uul ka eheen inay ku taageeraan markaa waxaad joogi kartaa degaanka deg-degga ah ilaa aad ka raadsaneyso meel aad si joogto ah ku noolaato. Haddii kawnsalka uusan ku siin waayo degaan deg-deg ah, markaa waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto hay'ad talo-siin guriyeyn si ay kuu caawiyaan.

Xulashoyinka deg-degga ah ee guriyeynta haddii aad guri'laawe tahay waxay yihiin:

- hostel, guryaha lagu badbaado habeenka iyo kuwa lagu badbaado xilliga jiilaalka
- guryaha magangalka haweenka iyo kuwa ka carrarey xad-gudubka guriga
- hotelada sarriir iyo quraac.

Kawnsalka xaafadda ayaa ku siin karo macluumaad ka badan. Waxaad xittaa caawinaad ka raadsan kartaa hay'ad guriyeyn ee xaafadda ku taalo. Waxaad codsan kartaa housing benefit (gargaarka guriyeynta) si lagugu caawiyo kharashka kirada. Qaar ka mid ah xulashoyinka degaanka waxay ahaan karaan qaali iyo waxaad u baahan kartaa inaad jeebkaaga ka bixiso lacagta dheerad u ah gargaarka kirada.

Macluumaad muhiim ah: Local Housing Department (Waaxda Guriyeynta Deegaanka)

ama Housing Advice Centre (Xarunta Talo-bixinta Guriyeynta) ayaa kuu xaqiijin karo haddii xaafaddaada ku yaalaan hostel ama guryaha lagu badbaado habeenka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan guriyeynta, fadlan Shelter kala xiriir 0800 800 4444. Waxay awoodaan inay ku siiyaan talo madaxbannaan ah iyo waxay kugu toosin karaan adeegyada habboon.

4A.10 Degaan: Waqooyiga Ireland

Northern Ireland Housing Executive (Hoggaamiyaha Guriyeynta Waqooyiga Ireland) (NIHE) wuxuu qabaa mas'uuliyad sharciyeed inay ku siiyaan caawinaad iyo talo haddii aad guri'laawe noqoto.

Ayadoo ku xiran xaaladdaada shakshiyadeed, waxay ku siin karaan degaan.

Waa inaad samayso codsiga guri'laawonimada. NIHE ayaa kani qiimeyn doono si ay u eegaan haddii ay mas'uuliyad u leeyihiin inay degaan ku siiyaan. Waxay qiimeynayaan haddii aad guri'laawe tahay, mudnaansho u baahan tahay, si ula kac guri'laawe iska dhigtey iyo/ama haddii deegaanka ku leedahay xiriir. Waxay ku siin karaan guri ku meel gaar ah intii ay ka baarayaan xaaladdaada.

Haddii lagugu qiimeeyey baahi mudnaansho (kani sababteedu yahay: carruurta qoyskaaga, qof qabo xannuun aad u xun – maskaxeed ama jireed, ku jirtid halis xad-gudub/rabshada guriga), iyo qanciso shuruudaha kale, markaa NIHE waa inuu kugu caawiyaa helidda degaan habboon aad ku noolaato. Kani waa in la helaa ugu yaraan labo sanno. Qasab kuma ahan inay ku dejiyan guri joogto ah.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho NIHE ka wac 03448 920 920

4A.11 Housing Benefit, Local Housing Allowance & Council Tax Benefit (Gargaarka Kirada Guriga, Guunada Deegaanka Guriyeynta & Gargaarka Canshuurta Kawnsalka)

Haddii dakhligaaga hooseeyo ama hesho dheefaha badbaadada (ceyr), waxaad heli kartaa housing benefit ama guunada guriyeynta deegaanka si lagugu caawiyo bixinta qayb ama dhammaan kirada gurigaaga. Waa inaad kani ka codsato kawnsalka. Waxaad xittaa codsan kartaa in lagugu garabsiiyo canshuurtaada kawnsalka. Badanaa codsiga housing benefit/housing support allowance waxuu ku yaalaa isla foom.

4A.12 Welfare Benefits (ceyrta)

Waxa ay Dawladdu si tartiib-tartiib ah u soo bandhigaysaa hal mar oo lacag bixin cusub ah (a new single payment) oo lagu magacaabo Universal Credit oo loogu talo galoay

dadka shaqo doonka ah amase uu hooseeyo dhaqaalaha soo gala (low income). Waxa ay taasi midaynaysaa qaybo taageero dhaqaale ah (benefits) ka kooban Gunnada Shaqo doonka (Jobseeker's Allowance) iyo Gunnada Guryaha (Housing Benefit) oo la mideeyey.

Universal Credit
Heerar ama tillaabooyin (stages) ayaa loo soo bandhigay Universal Credit. Haddii aad doonaysid in ad ogaatid in aad ku nooshahay halka aad ka dalban kartid Universal Credit waxaad eegi kartaa:
www,gov.uk/universal-credit'

Universal Credit waxa aad ka dalban kartaa internetka (online) oo ah:
www.gov.uk/universal-credit

Haddii aad qabtid wax su'aal ah waxa aad wici kartaa: Khadka caawinaadda Universal Credit oo ah: 0345 600 0723 (wicitaanku waxa uu noqon karaa mid lacag ah). Haddii aadan dalban ama codsan karin Universal Credit mafkaa, haddii aad xaq u leedahay, waxa aad dalban ama codsan kartaa noocyada taageerada ama cayrta hoos ku taxan.

Jobseeker's Allowance (JSA) (Gunnada Shaqo-raadiyaha)
Kani waa ceyr la siiyo dadka shaqo raadinaayo ama celcelis lahaan shaqeeyo in ka yar 16 saac usbuuci.

Waa inaad buuxisa foomka heshiiska shaqo-raadiyaha ama midka ballan-qaadka codsadaha. Kani wuxuu sheegaaya wixii lagaa rabo inaad samayso si aad shaqo u hesho. Wuxuu dhigayaa mas'uuliyaddaada inaad samayn doonto wixii aad awooddo si aad shaqo u hesho iyo in hawshaas taageero lagugu siin doono.

Waa inaad diiwangeliso dhammaan faalloyinkaaga shaqo-raadinta intii aad ka hesho ceyrta Jobseeker's Allowance (JSA). Haddii xilka ku saaran ka bixi weydo, xarunta shaqada waxay hakin karaan ama waxay joojin karaan ceyrtaada.

Waxaad heli kartaa koorsoyinka tababarka uu baxsho xarunta shaqada. Kuwaani waxaa ku jiro English Classes (Fasalada Luqada Ingiriiska (ESOL)). Waa inaad kani kala hadashaa Job Centre.

Income Support (Taageerida Dakhliga)
Income Support waa nooc ceyr la siiyo koox dad aan haysan lacag ku filan inay ku noolaadaan. Qiimayn-dakhli ayaa lagu baxshaa, waxaa laga wadaa in lacag walba aad qabtid la xisaabin doono si loo go'aamiyo imisa Income Support aad heli kartid.

England, Scotland iyo Wales
Si aad xaq u yeelato Income Support waa inaad qancisa shuruudahaan:

- da'u dhexeeyo 16 jir iyo da'da lagu qaadan karo Pension Credit (Gunnada Halwgabka).
- uur leedahay, ama tahay xannaano-bixiye; ama waalid keli ah ee leh cunug ka yar 5 jir ama, xaalado qaarkood, uusan awoodin inuu shaqeeyo xannuun ama naafonimo awgeeda.
- ann haysan dakhli ama dakhliga hooseeyo.
- shaqeeyo in ka yar 16 saac usbuuciba (iyo lammaanahaada uusan shaqayn in ka badan 24 saac usbuuciba).

Waqooyiga Ireland
Si aad Waqooyiga Ireland xaq ugu yeelato Income Support waa inaad qancisa shuruudahaan:

- Da'u dhexeeyo 16 jir iyo da'da lagu qaadan karo Pension Credit (Gunnada Halwgabka).
- Dakhli hoose.
- Shaqeeyo in ka yar 16 saacadood usbuuciba, ayadoo ku xiran caddadka mushaarkaaga.
- Aan si buuxda wax u baranin (laakiin waxaa jiro xaalado gaar ah).
- Aan helin Jobseeker's Allowance ama Employment and Support Allowance (Gunnada Taageerida Shaqada).
- Aan qabin lacag keyd ka badan £16,000.
- Ku nool Waqooyiga Ireland.

Ama

- Waalid keli ah.
- Oo fasax waalidnimo ama aabanimo ku jiro.
- Xannaaneeye.
- Qaxooti barto af Ingiriis oo yimid in ka yar hal sanno kahor.

Employment Support Allowance (Gunnada Taageerida Shaqada) (ESA)
Lacag-bixintaan waxaa loogu talagalay dadka jirro ama naafonimo qabo iyo aan shaqayn karin, ama shaqo xadaysan kaliya qaban karo. Intii aad gunnada ka helayso, job centre wuxuu ku siin doonaa talo-bixiye si gaar ah loo tababarey. Waxay ku siin karaan adeegyo kale ee baaxad ah oo loogu talagalay in laguu gudbiyo shaqo habboon.

Job Centre waxay u baahan kaaraan inaad buuxiso su'aalo-weydiimo ama tegto 'work capability assessment (qiimaynta Awoodda shaqo) '. Waxay xittaa qiimayn doonaan haddii aad keligaa shaqo raadsan kartid, ama haddii jirradaada ama naafonimadaada si xun saamayn ugu yeesho awooddaada shaqada, kaasina tallaaboyinkaan ka dhigaayo kuwo aan macquul eheen.

Waxaa lagu diri karaa takhtar ama kaaliye caafimaad, kuwaaso soo buuxin doono qiimayn iyo u diri doono DWP. Wuxuu xaqiijin doonaa sida jirradaada ama naafonimadaada u xadeeyo caddadka iyo nooca shaqada aad qaban kartid, iyo haddii aad u qalanto Employment and Support Allowance.

Waxaa jiro labo nooc oo ESA:

Work-Related Activity Group (Kooxda Wax-qabadka ee Shaqada La-xiriirta) - Kani waxaa la qabtaa haddii DWP uu u maleeyo inaad shaqayn doontid mustaqbalka. Job Centre wuxuu rabaa inaad ka qayb qaadato dhammaan waraysiyada diiradda saaro shaqada ay kaa casuumaan iyo waxaa xittaa lagaa baahan yahay inaad ka qayb qaadato wax-qabad xiriir la leh shaqada ama waxay kaa dhimi karaan ceyrta.

Support Group (Kooxyada Taageerida) - Kani waxaa loola jeedaa in DWP u go'aamiyey in xaaladdaada xadeeyo shaqada aad qaban kartid. Waxaad ka qayb qaadan kartaa waraysiyada shaqada diiradda saaro iyo wax-qabadka shaqada la xiriirta haddii aad go'aamiso.

Child Benefit (Gargaarka Cunugga)
Waxaad awoodii doontaa inaad hesho ceyrta Child Benefit haddii cunuggaaga yahay:

- 16 jir ama ka yar
- Ka wayn 16 jir laakiin ka yar 20 jir – iyo ku jiro wax-barasho ama tababar loo xisaabo Child Benefit
- Ka yar yahay 18 jir iyo goor dhow joojiyey wax-barasho ama tababar – laakiin ay shaqo, wax-barasho ama tababar isku qoreen adeegga xirfada, Connexions, adeegyada taageerida dawladda hoose, Wasaaradda Diifaaca ama la wax la mid ah

Haddii aad u baahan tahay talo dheeraad ah ee khuseeya Child Benefit, fadlan wac: 0300 200 3103

Child Tax Credit (Gunnada Canshuurta Cunugga)
Child Tax Credit waxaa la siin karaa dadka qabo carrur iyo dakhligooda hooseeyo ama helo ceyr.

- Ka yar 16 jir – waxaad codsan kartaa ilaa 31ka Agoosto ee ka dambeeyo

sanad-guuryadooda 16aad

• Aa yar 20 jir –waxaad codsan kartaa haddii aad ku jirtid tababar ama wax-barasho la ogol yahay.

Mas'uuliyadda cunugga
Waxaad caadi ahaan mas'uul ka tahay cunug haddii ay:

• Waqti walba kula nool yihiin;

• Caadi ahaan kula nool yihiin iyo aad tahay xannaaneeyahooda ugu wayn;

• Ku nool yihiin Yurub laakiin maaliyad ahaan adiga kugu tiirsan yihiin.

Haddii uu cunugga naafo yahay
Waxaad heli kartaa Child Tax Credits dheeraad ah haddii cunugga:

• Qaato ceyr dheeraad ah naafonimo awgeed.

• Uu ku diiwaangashan yahay sida qof indhoole ah (ama ahaa 28 usbuuc gudaheeda laga bilaabo taariikhda codsigaaga gunnada canshuurta).

Waxaad Job Centre kala xiriir kartaa:
Telefoon: 0800 055 6688 / Telefoonka qoraalka: 0800 023 4888

Wicitaanyadaan waa bilaash markii laga sameeyo khadh dhul, laakiin lacag ayaad bixin kartaa haddii aad ka soo wacdo telefoonka gacanta. Xafiiska Job Centre wuxuu qabaa khad telefoon bilaash ah aad isticmaali kartid. Xittaa qaar ka mid ah codsiyada waxaad ku samayn kartaa internetka.

Si aad u hesho macluumaad ka badan oo ku saabsan Child Tax Benefit, wac: 0345 300 3900 ama dadka dhegoolka ah ama dhibaato ku qabo hadalka ama maqalka waxay wici karaan: 0345 300 3909

Pension Credits (Gunnada Hawlgabka)
Si aad xaq u yeelatid Pension Credit:

• Waa inaad ku noolaataa dalka Ingiriiska;

• Adiga iyo lammaanahaada waa inaad gaarteen da'da xaq loo yeesho Pension Credit.

Da'da xaq loo yeesho Pension Credit wuxuu si tartiib ah noqon doonaa 66 jir, kaasoo la mid noqon doono kordhinta da'da hawlgabka dawladda ee haweenka oo ah 65 jir kaasina laga dhigi doono 66 jir haween iyo rag labaduuba.

Khadka codsiga Pension Credit
Telefoon: 0800 99 1234
Telefoonka qoraalka: 0800 169 0133
Isniin ilaa Jimco, 8subaxnimo ilaa 6habeenimo

4A.13 Gargaaro kale

Waxaa suurtogal ah inaad codsan kartid gargaaro kale haddii aad xannuunsan tahay, gurigaaga ku qabtid qof naafo ah, aad qof xannaaneyso ama qof adiga ku xannaaneyo ama duqowdey.

Waxaad la xiriiri kartaa Job Centre, ayaga ayaa kani kaala talin doono ama talo madaxbannaan waxaad ka raadsan kartaa ururka xaafaddaada khibrad u leh ceyrta. Xafiiska Talo-siinta Muwaadanka (Citizen Advice Bureau) ee xaafaddaada ayaa xittaa awoodo inay ku caawiyaan: http://www.adviceguide.org.uk

4A.14 Working Tax Credits (Gunnada Canshuurta Dadka Shaqeeyo)

Haddii aad shaqeyso iyo dakhligaaga hooseeyo, waxaad xittaa codsan kartaa working tax credits.

Si aad u qalanto waa inaad shaqeysaa tiro saacad cayiman usbuuciba.

- Haddii da'da u dhexeeyo 25 ilaa 59 jir – saacadaha la shaqayn karo usbuuca: Ugu yaraan waa 30 saacadood
- Haddii da'da yahay 60 jir ama ka wayn - Saacadaha la shaqayn karo usbuuca: Ugu yaraan waa 16 saacadood
- Haddii qofka Naafo yahay - Saacadaha la shaqayn karo usbuuca: Ugu yaraan waa 16 saacadood
- Haddii la yahay waalid kali ah oo leh 1 cunug ama ka badan - Saacadaha la shaqayn karo usbuuca: Ugu yaraan waa 16 saacadood
- Haddii la yahay lammaano leh 1 cunug ama ka badan - Saacadaha la shaqayn karo usbuuca: Caadi ahaan ugu yaraan 24 saacadood* (iyo 1 idinka mid ah shaqeeyo ugu yaraan 16 saacadood)

Si aad u codsato ama u hesho macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Khadka Caawinta Tax Credit
Telefoon: 0345 300 3900
Telefoonka qoraalka: 0345 300 3909

4A.15 Xadka Ceyrta

Xadka ceyrta wuxuu xadeeyaa ceyrta la baxsho sidii wadarta caddadka ceyrta la siiyo shakhsiyaadka ama qoyska lagu xadeeyo caddaad ugu badan:

- waalidiinta keli ah iyo lammaanayaasha carruur leh waxay heli karaan ilaa £500 usbuuciba
- dadka keli ah waxay heli karaan ilaa £350 usbuuciiba.

Housing Benefit waa la yarayn doonaa si looga hortago in wadarta ceyrta la helo uusan dhaafin xadayntaan.

Xadka wuxuu dabakhmaa haddii aadan shaqeynin iyo hesho ceyr sida income support, employment and support allowance iyo jobseeker's allowance. Housing Benefit waxaa lagu xisaabiyaa caddadka ugu badan ee ceyrta lagu siin karo, sidaa awgeeda wuxuu saamayn ku yeelan doonaa dadka baxsho kiro qaali ah. Waxaa suurtogal ah in lagugu darin xadka ceyrta haddii adiga ama xubin ka mid ah qoyskaaga heshaan ceyr gaar ah. Kani ma dabakhmo xaalado gaar ah.

4A.16 Ka shaqeynta dalka UK

Markii aad hesho kaadhkaaga Biometrik waxaad ku fasaxan tahay inaad shaqeyso. Dalka UK wuxuu dhaqan-geliyaa mushaarka ugu yar ee qaran. Fadlan hubi in shaqo-bixiyahaaga sicirkaan baxsho.

Macluumaad muhiim ah: Haddii aad qabtid khilaafyo ku xiran mushaarka ama jiraan wax-qabadyo sharci darro ah waa inaad la xiriirtaa Citizens Advice Bureau ee xaafaddaada. Macluumaad ku saabsan xafiiska kugu dhow waxaa laga heli karaa www.citizensadvice.co.uk

Miyaad shaqo raadinaysa
Haddii aad shaqo raadinayso, markaa tag xafiiska Job Centre ee xaafaddada si aad ka hesho liiska shaqoyinka. Xaafaddaada waxaa xittaa ku yaalo dhowr hay'ado shaqo oo xayeysiiyo shaqo.

Wargeysyada xaafadda iyo kuwa qaranka waxay xayeysiiyaan shaqo. Waa muhiim in aad eegto in shaqo-bixiyaha sumcad leeyahay iyo baxsho ugu yaraan mushaarka ugu hooseeya ee qaranka.

Codsiga shaqo
Shaqo-bixiyayaasha ayaa sheegi doono sida loo baahan yahay inaad codsiga u sameyso. Waxaa jiro waxyaabo kala duwan ee lagaa codsan karo:

1) **Curriculum Vitae (Warbixinta Shaqadaada iyo Wax-barashadaada)** – Waxaad badanaa maqli doontaa magaca la soo gaabshey ee "CV". Shaqo-bixiyaha wuxuu kaa codsan karaa inaad u dirto CV'gaaga. Kani waxaa ku qoran waayo-aragnimadaada iyo shahaadoyinka kale aad qabtid. Waa inaad ku qorto faah-faahintaada shakhsiyadeed, wax-barashadaada, taariikhda shaqada aad qabatey iyo shaqada mutadaawacnimo ah aad qabatey. Xafiiska Job Centre ee xaafaddaada ayaa kani kugu caawin karo.

2) **Foomka Codsiga Shaqada** – Shaqo-bixiyayaasha badankooda waxay kaa codsan doonaan inaad dhammeystirto foomka codsiga shaqada. Waxaad u baahan doontaa inaad telefoon ama email u dirto shaqo-bixiyaha aad rabtid inaad u shaqeyso iyo siido cinwaan aay ku soo diri karaan baakadka codsiga shaqada.

Baakadkaan waxaa ku qornaan doono faah-faahin ka badan ee khuseya shaqada. Faah-faahinta shaqada wuxuu kuu sheegi doonaa xirfadaha ama awoodda ay rabaan. Waa muhiim inaad xirfaddaada iyo waayo-aragnimadaada ku aadiso faah-faahinta shaqada markii aad shaqada codsanayso.

3) **Waraysiga shaqada** – Kadib markuu shaqo-bixiyaha tixgeliyo codsigaaga waxay kaa codsan karaan inaad waraysi u timaado si ay si dheeraad ah u qiimeyaan haddii aad ku habboon tahay shaqada. Waraysigaan waxaad la yeelan kartaa hal qof ama dad badan. Waxay kaa codsan karaan su'aalo ku xiran foomkaaga codsiga, waayo-aragnimadaada, xirfadahaada iyo sababta aad shaqada u rabtid. Waa fikrad fiican inaad sii fiican u baarto shirkadda aad rabtid inaad u shaqeyso kahor intii ay ku waraysanin iyo sii fiican u garato shaqada ay kaa codsan doonaan inaad qabato. Ka fikir su'aalaha ay ku weydiin karaan iyo sida aad uga jaaabi kartid.

Miyaad si guul leh shaqo u heshey?

Shaqo-bixiyahaada wuxuu kaa codsan doonaan inaad caddayso inaad xaq u leedahay inaad dalka ka shaqeyso kahor intii aadan shaqada bilaabin. Waa inaad tusisa Biometric Card (Kaadhkaaga Biometrikada) si aad kani u caddayso. Xittaa waa inaad siido National Insurance Number, laakiin qasab ma ahan inaad mid haysato si aad shaqo u bilowdo. Mushaarkaaga waxaa si otomaatik ah laga goyn doonaa canshuurta iyo caymiska qaranka. Haddii aad qabtid hal shaqo ka badan waa inaad u sheegto shaqo-bixiyahaaga iyo xafiiska canshuurta, si ay u beddelaan koodka canshuurtaada iyo u hubiyaan inaadan bixin canshuur ka hooseeyo.

Iskiis u shaqayste / ganacsi yar

Waxaa suurtogal ah inaad rabtid inaad iskaaga u shaqeysato ama bilowdo ganacsi yar. Dad badan ayaa kani si guul leh u sameeyo. Waxaad xaq u lahaan kartaa inaad amaah ama deeq codsato si kani lagugu taageero. Waxaad talo ka raadsan kartaa Citizens Advice Bureau ee xaafaddaada si aad u ogaato taageerida aad heli kartid. Waxaad xittaa u baahan doontaa inaad xafiiska canshuurta kala hadasho caymiskaaga qaranka.

Soo gudbinta Shahaadoyinka
Haddii aad shahaado qabtid oo aan laga aqoonsan karin dalka UK, ururyadaan ayaa ku caawin karo:

NARIC Free Advice: Haddii aad qaxooti tahay waxaad heli kartaa talo bilaash ah markaad lambarkaan wacdo: 0870 990 4088.

4A.17 Xaq u Lahaanshada Muwaadinimada Ingiriiska

Waxaa jiro toddobo shuruudo lagaa rabo inaad qanciso kahor intii aad codsi samaynin:

- Waa inaad ahaata 18 jir ama ka wayn.
- Waa inaad ahaata qof miyirkiisu dhan yahay (inaad sii fiican u garan kartid faalloyinkaaga).
- Waa inaad rabtid inaad ku sii noolaato dalka UK, ama u shaqeyso Boqortoyada, u shaqeyso urur caalami ah ee UK xubin ka ah, ama u adeegto shirkad ama urur lagu aasaasey dalka UK.
- Waa inaad heer macquul ah ku hadli kartid af Ingiriis, Welsh ama Skottish Gaelik
- Waa inaad lahaata aqoon kugu filan ee nolosha dalka UK.
- Waa inaad ahaataa qof leh dabeecad wanaagsan.
- Waa inaad qancisaa shuruudaha deganaanshada (hoos ka eeg).

Xadaynta Waqtiga ee Laanta Socdaalka ilaa Muwaadinimada Ingiriiska
Waa inaadan laanta socdaalka ka heysan waqti xad ah aad dalka ku joogto markaad codsanaysid dhalashada (hab-socodka oo qof ajnabi ah loo ogolaado inuu qaato dhalashada/muwaadinimada). Waa inaadan haysan xadaynta waqtiga ee laanta socdaalka 12ka bilood ee la soo dhaafey ee xilliga u qalmidda deganaashada. Kani waxaa loola jeedaa inaad codsigaan samayn kartid 12 bilood kadib markii lagu siiyo sharciga fasaxa joogitaanka aan xad leheen.

Waa inaad dalka UK si sharci ah ku joogtey waqtiga u qalmidda. Waa laguu diidi karaa codsigaaga dhalashada haddii aad jebisey sharciyada haajiirada waqtigaas gudahiisa. Ikhtiyaar gaar ah ayaa la isticmaali karaa markii la eegaayo u qalmidda deganaanshada, kaaso ku xiran waxyaabaha sababey jebinta sharciga.

Waqti aad joogto dibedda dalka UK
Waa inaadan dalka UK dibeddiisa ku maqnaanin in ka badan 450 maalmood muddo shan sanno kahor intii aad codsiga sameynin. Waa inaadan ku maqneen in ka badan 90 maalmood dibedda dalka UK 12ka bilood la soo dhaafey kahor intii aad codsiga samaynin.

Haddii aad qancin karin shuruudahaan deganaanshada laakiin u malayso inay jiraan xaalado gaar u ah kiiskaaga, waa inaad macnayso markii aad codsiga sameyneyso.

Dabeecad wanaagsan
Si aad u caddayso inaad tahay qof dabeecad wanaagsan leh waa inaad muujisaa inaad raacdey sharciyada iyo waajibaadyada dalka UK.

Looma arki doono inaad tahay qof dabeecad wanaagsan leh haddii dembi lagugu xukumey. Kuwaani waxaa ka mid ah ciqaab xabsi, ganaax ama adeegga bulshada. Lagama yaabo in lagu siin doono muwaadinimo ilaa arrimahaan laga saaro diiwaankaaga. Kani waa waqtiga uu ku qaadan doono in laga saaro diiwaankaaga kadib markaad ciqaabtaada dhammeyso. Kani wuxuu u dhaxeeya muddo 3 sanno ilaa 15 sanno. Home Office lagama yaabo inuu muwaadinimada siiyo dadka lagu ciqaabey xabsi 4 sanno ama ka badan.

Muwaadinimada Ingiriiska ee carruurta
Haddii goor dhow lagu siiyey sharciga'Indefinite Leave to Remain/stay'(ILR), iyo aad qabtid cunug ku dhashey dalka UK waqtigaan kahor, waxaad awoodi doontaa inaad cunuggaada ku diiwangeliso sida Muwaadin Ingiriis ah.

Haddii aad cunug dhasho kadib markii lagu siiyo sharciga 'Indefinite Leave to Remain' markaa cunuggaga wuxuu ku dhalan doonaa dhalasho Ingiriis. Waxa aad macluumaad dheeraad ah ka eegtaa:
https://www.gov.uk/becoming-a-british-citizen/check-if-you-can-apply
Fadlan ogsoonow in ay jiraan qiimo kala duwan ee kharajka arjiga jinsiyadda.

4A.18 Isku Keenida Qoyska

Haddii lagu siiyey badbaadin bin'aadin ama aqoonsi qaxooti waxaad xaq u lahaan doontaa inaad codsato isku keenida qoyska.Isku keenida qoyska waxaa loogu talagalay in xubin qoys diiwangashan kugu soo biiro dalka UK. Waxay kugu soo biiri karaan isla shuruudaha fasaxaada joogitaanka.

Kuwaani waxaa ka mid ah: xaas/nin, lammaane sharciyeed iyo aan is-qabin/ lammaanayaasha isku jinsi ah. Kuwaani waxaa xittaa ku jiro carruurta ka yar 18 jir oo kugu tiirsanaa iyo qoyskaaga ka mid ah ka hor intii aadan soo qaxin. Kani waxaa xittaa ku jiro carruurta uurka ku jirey kahor intii aadan soo bixin.

Home office waxay ogolaan karaan isku keenid xubin qoys kale haddii ay jiraan sababo naxariis oo kiiskooda loo tixgeliyo shuruudo ka baxsan Xeerarka Socdaalka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrintaan waxaa laga heli karaa Shabakadda Internetka ee Home Office-ka ee hoos ku qoran:
www.gov.uk/settlement-refugee-or-humanitarian-protection/family-reunion

4A.19 Fasalada af Ingiriiska

Waxaad xulan kartaa inaad wanaajiso xirfaddada Ingiriiska.Kani waa hab fiican aad ku fahanto noolosha dalka UK iyo la qabsato jaaliyadda xaafaddaada. Waxaad rabi kartaa inaad barato af Ingiriis si uu kugu caawiyo helidda shaqo, wax ku barato, kugu caawiyo noolol-malmeedka iyo barashada dadka. Waxaad awoodda inaad tegto fasalada ESOL (Ingiriiska Dadka Ku Hadla Luqado Kale). Waxaad ka bilaabi kartaa heerka kuu habboon. Waa lagu qiimayn doonaa si loo ogaado heerkaaga Ingiriiska kadibna waxaa lagugu bilaabi doonaa heer adiga kuu habboon. Waxaad baran doontaa

- Ingiriiska Lagu Sheekaysto.
- Dhegaysiga Ingiriiska.
- Akhrinta iyo qoridda Ingiriiska.
- Ereyada.
- Xarakaynta iyo naxwaha.

Si aad u codsato koorso ESOL waa inaad la xiriirto kulliyada waxbarashada dheeraadka ah ee xaafaddaada.

Koorsoyinka caadi ahaan waxay bilowdaan bisha Seteembar. Haddii aad dhibaato ku qabtid helidda kulliyad baxsho koorso ESOL habboon, weydii xafiiska JobCentre Plus ee xaafaddada inuu ku caawiyo.

Miyaa layga rabaa inaan lacag baxsho?
England
Haddii aad hesho Job Seekers Allowance ama hesho ESA ku salaysan shaqo, waxaad awoodi doontaa inaad hesho fasalo af Ingiriis bilaash ah.

Wales
Casharrada ka baxa fasallada af Ingiriiska Dadka Ku Hadla Luqado Kale (ESOL) ee Wales-ka waa bilaash ama lacag la'aan.

Scotland
Waxaad codsan kartaa in lagugu caawiyo maalgelinta fasalada af Ingiriiska:

- Ujrada iyo taageerida ardayda dhigto Higher Education (Wax-barashada Sare) (HE).
- kharash dhaafida iyo deeq ikhtiyaar lagu taageero Further Education (Wax-barashada Dheeraadka) (FE).

Waxaad kani samayn kartaa haddii aad deggane caadi tahay maalinta koowaad uu koorsaha bilowdo.

Xaaskaaga/ninkaaga, lammaanahaada sharciyeed ama cunuggaaga ee qanciyo shuruudaha deganaanshada caadiga ah ee Scotland ayaa xittaa u qalmo koorsada.

Waxaad xittaa xaq u lahaan kartaa Individual Learning Account (Akowntiga Shakhsiyadeed ee Wax-barasho) ama Education Maintenance Allowance (Gunnada Dayactirka Wax-barashada).